# Istarooga ku Dhaca Carruurta
# Strokes in Children (Somali)


Istaroog ayaa yimaada marka qulqulka dhiiga ku socoda gudaha ama nawaaxiga maskaxda uu si lama filaan ah u xirmo. Waxa uu keeni karaa dhaawac joogto ah oo ku dhaca qaybta maskaxda ee aan dhiiga helayn. Mararka qaar istarooga ayaa keeni kara dhiig ku furma maskaxda.

Istarooga ayaa ku dhici kara da' kasta. Istarooga ku dhaca carruurta ayaa mararka qaar adag in la baaro waayo ciladaha kale ee neerfaha (maskaxda) ayaa leh isla calaamadahaas.

## Noocyada istarooga

Waxaa jira laba nooc oo istaroog ah: ischemic iyo hemorrhagic.

- Istaroogyada **Ischemic** (iss-KEEM-ick) ayaa yimaada marka qulqulka dhiiga ku socda maskaxda ay xidho xinjir ama uu yaraado dhiiga ku qulqulaaya xidid ama halbawle (Sawirka 1). Waxaa jira 2 nooc oo istarooga ischemic ah:
  - Nooca ischemicga ee ku dhaca xididada markuu ku dhaco xidid gala maskaxda.
  - Cerebral sinus venous thrombosis (CSVT, Istarooga halbawlayaasha dhiiga ee maskaxda) marka uu ku dhaco halbawle wayn oo ku jira aaga u dhaxeeya lakabyada sare ee maskaxda. Meelahaan banaan ayaa ka caawiya dhiiga inuu kasoo baxo maskaxda.




**Sawirka 1 aad** Xirjir dhiig ah oo maskaxda ku xiranta ayaa keeni karta istarooga ischemic.


©2009, dib loo eegay 2020, Nationwide Children's Hospital
Sii socda…

- Istaroogyada **Hemorrhagic (hem-or-AJ-ick)** ayaa yimaada marka qayb jilicsan (aneurysm) ama dhaawac ku yaala gidaarada halbawlaha dhiigu uu dilaaco ama qarxo.

## Astaamaha

Astaamaha istarooga si fudud ayaa cudur kale loogu khaldi karaa. Waxay u ekaan karaan xanuunada kale, sida ilmo dilanka ama qalalka. Istaroogyada ayaa si gaar ah ugu dhacaaya cunug kasta ayadoo ku xiran da'diisa iyo nooca istarooga.

- Ilmaha saqiirada ah iyo kuwa da'da yar, astaamaha ayaa noqon kara kuwo degdeg ah ama socon kara muddo sanado ah.
- Carruurta waawayn, astaamaha ayaa ah kuwo degdeg ah lana mid ah kuwa dadka waawayn.

**Markaad aragto hal kamid ah ama ka badan astaamaha soo socda oo dhammaan si degdeg ah ku dhacaaya, DHAKHSO uga falceli oo wac 911.**

**DHAKHSO uga falceli adoo wacaaya 911**

- <u>**W**</u>aji dhaca – Qaybo ama dhammaan gees kamid ah wajiga ayaa hoos u dhacaaya.
- <u>**D**</u>aciifnimada gacanta – Hal gees oo kamid ah jirka ayaa noqonaaya daciif, bilaa dareen ama aan dhaqaaqi karin. Waxay noqon kartaa kaliya hal gacan, lug ama wajiga ama waxay noqon kartaa dhammaan dhinacaas.
- <u>**C**</u>iladaha hadalka – In cunugu xabeebsato, uusana awoodin inuu hadlo ama uu dhibaato ku qabo hadalka ama fahanka waxa la sheegay.
- <u>**X**</u>iliga ay tahay inaad wacdo **911**

Astaamaha kale ee degdega ku dhici kara waxaa kamid ah:

- suuxdin
- inaan qofku fahmi karin fikradaha ama tilmaamaha fudud
- inuu wareero ama uusan ogayn waxa socda
- madax xanuun (madax xanuunkii ugu darnaa ee ilmaha soo mara noloshiisa)
- dawakhsanaan
- luminta dheelitirnaanta ama iskuxirnaanta jirka
- dhibaato qofka ka haysata inuu socdo
- hurdo xad dhaaf ah ama tabar la'aan (inuusan lahayn wax awood ah)
- isbadelo ku dhaca araga hal il ama labada indhoodba
- dhib ka haysata wax liqida

Haddii aad isleedahay cunugaaga waxaa ku dhacay istaroog, **wac 911**. Haddii aan shaqaalaha gurmadku diyaar ahayn, **gee cunugaaga waaxda xaalada degdega ah ee isbitaalka kuugu dhaw isla markaba.**

## Baaritaanada

Si loo baaro istarooga, dhakhtarka ayaa:

- Fiirinaaya taariikhda caafimaadka ee wixii dhacay.
- Samaynaaya baaritaanka neerfaha (neerfaha maskaxda). Hubinaaya qaybaha sida awooda gacanta iyo lugta, dhaqdhaqaaqa, dareemaha (araga iyo taabashada) iyo xasuusta.
- Wax kaa waydiinaaya taariikhda caafimaadka cunugaaga iyo kan qoyskaaga.
- Samaynaaya baaritaano. Noocyada baaritaannada la samaynaayo ayaa ku xiran nooca istarooga dhakhtarkaagu isleeyahay wuu ku dhacay cunugaaga.
  - Iskaanka CT (farsamada casriga ah ee kumbuyuutarka) ayaa sawiro ka qaadaaya maskaxda. Asaga ayaa lagu hormari karaa maadaama uu iskaanku bixinaayo natiijooyin degdeg ah.
  - MRI (sawirka gudaha jirka) ayaa muujinaaya isbadelada yaryar ee ku dhaca maskaxda iyo halbawlayaasha dhiiga. Waxa uu sawir wanaagsan ka bixin karaa maskaxda si ka fiican iskaanka CT laakiin wuxuu qaataa muddo dheeraad ah in lagu sameeyo. cunugaaga ayaa u baahan kara in la daroogeeyo (daawo hurdo la siiyo) kahor intaan MRI ka la saarin si uu daganaansho u lahaado inta lagu jiro baaritaanka.
  - Angiograms - Iskaanka MRA (magnetic resonance angiogram), CT angiography iyo MRV (magnetic resonance venography) ayaa si dhaw u eegaaya halbawlayaasha dhiiga.

## Waxyaabaha Keena

Waa muhiim in la iskudayo raadinta waxa keena istarooga si loo go'aansho daawada saxda ah. Mararka qaar wax sabab keentay istarooga ayaan la helin. Daawada ayaa gacan ka gaysan karta yaraynta khatarta waxyeelo dheeraad ah iyo suurtagalnimada in istaroogyo kale ku dhacaan cunuga.

**Waxyaabaha ugu badan ee keena istarooga ischemic:**

- Halbawlayaasha dhiiga ee aan caadiga u shaqaynayn ee ku jira maskaxda iyo qoorta
- Cilado ka jira wadnaha, xalfaayada wadnaha iyo halbawlayaasha dhiiga
- Cudurka dhiig shubanka (Sickle cell disease, SCD)

- Xanuunada lafaha
- Fuuqbaxa (dheecaan qalalka)

**Waxyaabaha ugu badan ee keena istarooga hemorrhagic:**

- Halbawlayaasha dhiiga ee aan caadiga u shaqaynayn ee ku jira maskaxda – cudurka aneurysm ama AVM (cilada xidididada dhiiga xanbaara). AVM waa xirmo halbawlayaasha dhiiga ah oo ciladaysan kuwaas oo dhiigbax samayn kara.
- Burooyinka
- Ilmaha ku dhasha dhicisnimada wayn – halbawlayaasha dhiiga ayaan lahayn awood iyo qaangaarnimo

**Labada nooc ee istaroogaba waxaa keeni kara waxyaabaha soo socda:**

- Dhaawaca ama dilaaca gidaarka halbawlaha dhiiga
- Caabuq, sida caabuqa maskaxda
- Ciladaha dhiigbaxa ama xinjiroowga
- Hulaaqa (bararka)
- Qaliinka wadnaha ama maskaxda ama dhaawac ku yimaada gidaarka halbawle

## Waxa laga filan karo isbitaalka kadib marka cunuga la baaro

- Koox taqasuslayaal ah ayaa daryeeli doona cunugaaga oo sameyn doona waxyaabaha soo socda:
  - Si joogto ah ayay u hubinayaan astaamaha muhiimka ah, sida xawaaraha wadnaha (garaaca), cadaadiska dhiiga, neefsiga iyo heerkulka.
  - Waxay baarayaan neerfaha waxayna ka eegayaan isbadelo ama cilado imaan kara, sida suuxdin, cadaadis dheeraad ah oo saaraan maskaxda iyo astaamaha istaroog kale.
  - Waxay baarayaan ciladaha shaqada jirka, sida hadalka, dhaqdhaqaaqa, waxbarashada, habdhaqanka ama dib u dhaca kobaca maskaxda cunuga (hormar).
- Haddii aan la aqoon sababta keentay istarooga, adeeg bixiyaha caafimaadka. ayaa amri kara baaritaano dheeraad ah, sida:
  - baaritaannada dhiiga ee eegaaya xirjiraha, dhiigbaxa ama hulaaqa
  - iskaanka maskaxda, iskaanka halbawlayaasha dhiiga ee maskaxda iyo qoorta
  - baaritaanka dhawaaqa (echocardiogram) si loo dhagaysto wadnaha

- baaritaanka lafdhabarka (tuubo lagasho lafdhabarta) si loo baaro caabuq ku jira lafdhabarka ama maskaxda

- Cunugaaga ayaa u baahan kara:
    - daawayn si uu u helo oksijiin dheeraad ah iyo dhiig lagu shubo maskaxda
    - daawooyin furaaya xididada yaryar (anticoagulants) si looga horato xinjiro isku gooya meesha
    - antibayootig lagu daawaynaayo caabuqa
    - baaritaan ama qaliin si loo furo dhiig xiran ama loo yareeyo saameynta bararka maskaxda

- Haddii cunugaagu dhumiyo shaqada jirka, dhakhtarka ayaa u gudbin kara baxnaaninta neerfaaha. Koox khubaro ah waxaa ku jiri kara dhakhaatiir kaladuwan, kalkaalisooyin iyo baxnaaniyaasha jidhka, shaqada jirka iyo hadalka. Waxay ka caawin doonaan cunugaaga inuu dib ugu laabto heerka ugu sareeya ee shaqada, jir ahaan, dareen ahaan iyo bulsho ahaan.

## Daryeelka dabagalka kadib marka isbitaalka laga saaro

- Muddada uu cunugaagu ku bogsoodo ayaa ku xiran waxa keenay istarooga, saamaynta ku dhacday maskaxda iyo sida cunugaagu uga falceliyo daawada. Carruurta qaar ayaa caadi kusoo laabta isla markaba. Qaar kale ayaa u baahan kara muddo dheer inay bogsoodaan.
- Marka uu ku dhaco istaroog daran, cunugaaga ayaa u baahan kara in la geeyo xarunta baxnaaninta si baxnaanin adag loogu sameeyo kahor intuusan guriga ku laaban.
- Cunugaaga ayaa baxnaanin loogu samayn doonaa Xarunta Caafimaadka Istarooga Carruurta. Waxa uu u baahan karaa balamo gaar ah oo uu la yeesho dhakhaatiir kaladuwan.
- Cunugaaga ayaa u baahan kara inuu qaato daawo si looga hortago dhiig xiranka. **Waa inaadan cunugaaga siin wax daawooyinka xanuun baabi'inta ah adigoon marka hore waydiin dhakhtarkiisa.** Daawooyinka qaarkood, sida ibuprofen (Motrin®), ayaa keeni kara cilado ku yimaada daawaynta cunugaaga.
- Usoo qaad liiska dhammaan daawooyinka cunugaagu qaato balamaha baxnaaninta xaaladiisa. Markaad sidaas samayso, kooxda daryeelka caafimaadka ayaa badeli kara daawada cunugaaga marka loo baahdo.

Haddii aad qabtid wax su'aalo ah, hubso inaad weydiisid dhaqtarka ama kalkaalisada canugaaga.

## Ilaha Xogta Istarooga Ku dhaca Carruurta:

- Children's Hemiplegia and Stroke Association: www.chasa.org
- Pediatric Stroke Warriors: www.pediatricstrokewarriers.org
- Sickle Cell disease Association of America: www.sicklecelldisease.org
- United 4 Pediatric stroke: www.united4pediatricstroke.org/life-after-stroke-resources
- International Alliance for Pediatric Stroke: www.iapediatricstroke.org